

## **Digniin Waxqabad**

Guddiga Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada ayaa qaadaya sharci lagu kordhinayo qaaciddada gargaarka aasaasiga ah ee waxbarashada 2% isla markaana mustaqbalka lagu kordhinayo sicir bararka. (Kani waa qaaciddada sharci-dejintu u adeegsato inay ku go'aamiso inta ay maalgelinayso degmo dugsiyeedyadu.) Dhageysiga, oo loo qorsheeyay Arbacada, Febraayo 10 markay tahay 10:30 subaxnimo, waxaa ku jira House File 843 (Rep. Zack Stephenson D-Coon Rapids) oo ay taageerayaan ururada waxbarashada ee ka kala socda daafaha gobolka.

**Fadlan wac ama iimayl u dir Wakiilka Gobolkaaga** (taleefankaaga gacanta ku hayso si aad u aragto inaad ku metelayso- <https://www.gis.leg.mn/iMaps/districts/>) kuna boorri inay taageeraan HF 843.

Dugsiyadu waxay u baahan yihiin maalgelin xasilloon, oo la saadaalin karo. Iyadoo lagu xiraayo qaaciddada kaalmada waxbarashada aasaasiga ah iyo sicir-bararka, sharcigaan wuxuu u oggolaanayaa degmooyinku inay qorsheeyaan miisaaniyadooda ayna maal-gashadaan agabka fasallada iyo shaqaalaha loo baahan yahay.

Lama saadaalinkaro nidaamka maalgalinta waxbarashada ee hada ka jirta gobolka waxay u baahan tahay degmooyinku inay ku wargaliyaan shaqaalaha shaqo ka ceyrinta kaliya inay ka noqdaan ogeysiisyada shaqo ka joojinta hadii sharci dajintu ay bixiso lacag ku filan oo lagu daboolayo kororka sicir bararka ee kharashaadka. Wareeg-socodka bust-maalgalinta waxbarashada ayaa niyad jab ku ah shaqaalaha waxayna ka dhigeysaa mid aad u dhib badan in la qorsheeyo lana sameeyo isbeddelada loo baahan yahay iyo maalgashiga dugsiyadeenna.

**Codkaagu waa muhiim.** Fadlan wac ama email u dir [\\_ Wakiilkaaga Gobolka](#) oo weydii iyaga inay taageeraan HF 843.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan HF 843, booqo Guddiga Dhaqaalaha ee Golaha Aqalka <https://www.house.leg.state.mn.us/Committees/home/92004>. Dhageysiga waxaa lagu sii dayn doonaa <https://www.house.leg.state.mn.us/htv/schedule.asp>.